# Laanta Daacadnimada Barnaamijka

Kaalinta Qaybta Barnaamijka Isdhaxgelinta (PIB) waa in la xaqiijiyo in qoysaska reer Kentucky ay helaan dheefaha ay u qalmaan, la socdaan shuruucda ku saabsan barnaamijyada kaalmada shacabka, oo ay isticmaalaan dheefahooda si waafaqsan shuruucda Kentucky iyo Adeega Cuntada iyo Nafaqada USDA (FNS).

PIB waxaa loogu talo geley in lagu taageero shaqaale waaxyada ee Waaxda Adeegyada Bulshada Ku Salaysan (DCBS) ee turjubaya siyaasada Dalabyada iyo in kor loo qaado barnaamijka daacadnimada ee dhamaan barnaamijyada kaalmada shacabka.

PIB waxay ka kooban tahay Qaybta Maamulida Dalabyada iyo Qaybta Daacadnimada iyo Falanqaynta

## Qaybta Maamulida Dalabyada

Masuuliyada kormeerka baadhitaanka khiyaanada iyo uruurinta lacagta dheeraadka ah ee barnaamijyada kaalmada shacabka ee kala duwan e eay maamusho DCBS oo waxaa kamid ah laakiin kuma koobna: Supplemental Nutrition Assistance Program (Barnaamijka Kaalmada Nafada Dheeraadka ah, SNAP), Simplified Assistance for the Elderly (Barnaamijka Kaalmada U Fududaynta Waayeelka, SAFE), Kentucky Transitional Assistance Program (Barnaamijka Kaalmada Kala Guurka ee Kentucy, KTAP), Kinship Care (Daryeelka Qaraabo), Child Care (Daryeelka Ilmaha , Medicaid, iyo kuwo kale oo badan.

### Yaa ka masuul ah bixiya dalabka?

Dalabyada waxaa laga uruurin karaa dadka waawayn ee qoyska wakhtiga aad qaadato dheefo dheeraad ah oo ka badan intii ay tahay inaad qaadato. Tani sidoo kale waxaa kamid ah wakaalada la ogol yahay, wakiilka loo wakiishay xarunta daawaynta Balwada Mukhaadaraadka iyo Khamrida, qaraabada daryeesha wax, shakhsiyaadka maskamadu ku amartay, iwm.

### Qaabka Loo Gudayo Dalabka

Dalabyada waxaa la gudi karaa iyada oo la isticmaalayo mid kamid ah ikhtiyaarada soo socda:

- **Yaraynta Gunada.** Hadii qoysku leeyahay nooc dalab oo loo arko Khalad Hay'adeed ama Khalad Qoyska Wax u Dhimay, oo cidii ka masuulka ahaydna qaadanayso dheefaha barnaamijka SNAP ama KTAP, shuruucda sharciga federalka ee nagu waajibinaya in aan si toos ah uga jaro $10.00 ama 10% ee dheefahaaga bishii, kolba ka badan. Hadii qoysku leeyahay nooc dalab oo loo arko Xad Gudubka Barnaamijka oo Ula Kac ah, shuruucda sharciga federalka ee nagu waajibinaya in aan si toos ah uga jaro $20.00 ama 20% ee dheefahaaga bishii, kolba ka badan. Qoysku waxa uu leeyahay ikhtiyaar inuu dalbado xadi dheeraad ah oo uu ku dalbanayo yaraynta dheefaha oo toos ah ee jira.
- **Lacag bixinta onleynka ah.** Si aad dalabka lacag bixinta ugu gudbiso onley, qabo https://kynect.ky.gov. Sameyso xisaab ama gal xisaabta hore ee Kentucky Online Gateway (KOG), kadina gal “Claims & Payments Dalabyada iyo Lacag Bixinta)” ee dhanka bidix ee liiska ah.
- **Jeega ama dalabka lacagta.** Lacagtan waa in la siiyaa Waaxda Xisaabaadka Gobolka Kentucky, oo waa in lagu daro magaca daabacan iyo lambarka dalabka noocan lacagta. Lacagtaada ugu dir boosta cinwaanka soo socda:

  Qaybta Maamulida Dalabyada<br>
  275 E Main St, 3E-I<br>
  Frankfort, KY 40621

- **Xadiiska Bixinta Cashuurta (RIC).** Hadii aanad bixin lacagta ama aad jabiso heshiiska bixinta lacagta, dalabkaaga waxaa loo diri doonaa hay'ado kale oo kaa qaada. Hadii ay taasi dhacdo, waxaa lagaa qaadi karaa kharashka uruurinta. Waaxda Dakhliga, Kentucky, Qaybta Uruurinta, ayaa ka qayb qaadan karta dhamaan ama qayb kamid ah gudista cashuurta dakhliga Kentucky ilaa inta lacag dheeraadka ah ee la bixiyay la wada gudayo.
- **Barnaamijka Bixinta ee Waaxda Maaliyada (TOP).** Hadii aanad bixin lacagta ama aad jabiso heshiiska bixinta lacagta, dalabkaaga SNAP waxaa loo diri doonaa hay'ado kale oo kaa qaada. Hadii ay taasi dhacdo, waxaa lagaa qaadi karaa kharashka uruurinta. TOP waxaa weeye barnaamij uruurin waajib ah oo federalka ah oo u ogolaanaya faro gelinta lacagaha federalka (loo yaraan bixinta), sida gudista cashuurta dakhliga federalka, mushaharka federalka, iyo lacag bixinta soosaal sekuuritiga. SNAP la jarayo waxaa loola jeedaa TOP kadib marka lacag ka jarista la sugo ugu yaraan 120 maalmood ama heshiiska gudista ayaa la sameeyay laakiin lama raacin.

### Su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan dalabyada?

Fadlan kala xidhiidh Qaybta Maamulida Dalabyada 502-564-3440 inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo iyo 4:30 galabnimo ET, Isniin ilaa Jimce, ama gudbi iimeelka chfscms@ky.gov. Waxaad ku dartaa iyo/ama lambarkaaga dalabka waa in lagu diyaariyo.

### Miyaad qabtaa wax su'aal ah oo ku saabsan u qalanka ama dheefahaaga kaalmada shacabka ee wakhtigan?

Hadii aad wakhti xaadirkan qaadato kaalmada shacabka oo aad doonayso inaad hesho kaalmada shacabka oo aad ka qabto su'aalo ku saabsan dheefaha, fadlan a xidhiidhka Taageerada Qoska DCBS adiga oo isticmaalaya mid kamid ah ikhtiyaarada soo socda:

- Kala xidhiidh Xarunta Adeega La Hadalka taleefanka bilaashka ah ee 855-306-8959 inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo iyo 4:30 galabnimo ET Isniin ilaa Jimce iyo inta u dhaxaysa 9:00 subaxnimo iyo 2:00 duhurnimo ET Sabtida;
- Ka gal https://kynect.ky.gov si aad u samaysato xisaab ama isku duwaan geliso xisaabtaada hore ee KOG oo ku dalbo onleyn; ama
- Qabo Xafiiskaaga Taageerada Qoyska ee deegaanka. Ka hel xafiiska kuugu dhaw https://prd.webapps.chfs.ky.gov/Office_Phone/.

### Kaalmada Caafimaadka

Hadii aad qabto wax su'aalo ah ama tabasho ah oo ku saabsan lacagada caymiska iyo lacagahaaga, fadlan kala xidhiidh 855-4kynect (1-855-459-6328) ama waxaad ka geli kartaa macluumaadkaaga ku biiritaanka adiga oo dooranaya Caymisyada Caaifmaadka ee liiska dhanka bidix.

### Dalabyada Daryeelka Ilmaha

Hadii aad ka qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan dalabyadaada Daryeelka Caafimaadka, fadaln kala xidhiidh Waaxda Dalabyada Daryeelka Ilmaha 844-209-2657.

## Qaybta Daacadnimada & Falanqaynta

Masuuliyada kormeerka baadhitaanka khiyaada kaalmada shacabka ee barnaamijyada kaalmada shacabka ee kala duwan waxaa kamid ah laakiin kuma koobna SNAP iyo KTAP.

## Kontorobaaninta & Isticmaalka Khaldan ee EBT

Kontorobaanintu waa:

- Ficilka ama isku dayka iibinta, iibsashada, ama ku bedelesha wax dheefaha SNAP, kaadhadhka EBT, lambarada kaadhka EBT, ama Lambarka Aqoonsiga Shakhsi Ahaaneed (PIN) wixii lacag ama eegitaan ah ee kale ee u qalanka shayada cuntada.
- Ku bedelashada dheefaha SNAP, kaadhadhka EBT, lambarada kaadhka EBT, ama PIN si loo iibsado shayada aan u qalmin ee khamria, sabuunta, tubaakada, hubka, rasaasta ama waxyaabaha qarxa, ama waxyaabaha mamnuuca ah.
- Dib u iibinta ama wax ku bedelasho iibsiga cuntada ee dheefaha SNAP.
- Isticmaalka cuntada la iibsaday ee dheefaha SNAP ee diyaarinta shayada cuntada ee la doonayo in la iibiyo.

Isticmaalka khaldan waa:

- Isticmaalka dheefaha SNAP si loo iibsado xisaabta daynta, xataa hadii loogu talo geley gunada u qalanta SNAP.
- In loo ogolaado in uu ruux galo EBT-kaaga iyo PIN-kaaga kaadhka si uu u isticmaalo ruux aan xubin ka ahayn kooxdaada gunada ama wakiil loo ogol yahay ah.
- Ku iibsiga cunto dheefaha EBT ee loogu talo geley SNAP-ka qoyskaaga laakiin in la siiyo cuntada ruux ama qoys kale.
- U isticmaalka si khaldan dheefaha, laakiin aan qaab ahayn sida ku cab kontorobaaninta.

## Yaa loogu talo geley dheefahayga?

Dheefaha EBT waxaa isticmaalaya ruux walba oo ku jira kooxdaada dheefaha Haku iibsan shay dheefahaaga EBT ruuxna ka baxsan kooxdaada guno, sidoo kale waa in aanad u ogolaanin inuu cid ka baxsan kooxdaada guno oo aan ahayn xubin loo ogol yhaay inuu helo EBT-ga kaadhkaaga ama PIN-kaaga.

## Waa maxay taxooyada gunada elektorooniga ahi?

Akhrisashada Xogta Muhiimka ah iyo Nuqul Ka Samaysiga:

- Akhrisashada Xogta muhiiimka ahu waxay dhacdaa marka dadka wax khiyaamaynayaa ay ku dhejiyaan aalad Mishiinka Lacagta Lagala Baxo (ATM), mishiinka Meesha Wax Laga Iibsado (POS), baadhka PIN-ka lambarada kaadhka si loo xado iyo macluumaadka kaadhka ee kale ee kaadhadhka EBT, kaadhaadhka daynta, ama kaadhadhka bixinta. Aaladahan waxaa la gelin karaa si ilbidhiqsi ah oo waxaa adag in la ogaado maadaama oo loogu talo geley inay u eekaadaan qayb kamid ah mishiinada ATM, POS, ama baadhka PIN-ka.
- Dadka khiyaamaynaya waxay isticmaali karaan xogta la xaday si loo sameeyo kaadhadhka fooljariga ah birlabta la mariyo kaadhka ee banaan, ama kaadhadhka hadyada xataa ee tukaano kala duwan. Aalad ku rakibinadan waxaa loo adeegsadaa in lagu xado lacagta ama kaalmada gunada ee bishii marka wax lagu iibsadano inta meesha la qabsado ama onleyn ah.

Phishing & Spoofing:

- Weeraran waxaa lagu bixiyaa qaabab elektoroonig ah sida iimeel, fariin qorala ah, ama ku hadal taleen oo cida khiyaanada samaynayaa waxay isku dayaysaa inay shakhsiyaadka ku qanciyaan inay bixiyaan macluumaadka xisaabtooda EBT iyaga oo iska dhigaya dadka lagu kalsoon yahay ee sida DCBS.

## Maxaan samayn karaa si aan uga hortago xatooyada gunada elektorooniga ah?

Waxaa jira shayo badan oo shakhsigu uu samayn karo si uu gacan uga gaysto kahortaga xatooyada gunada elektorooniga ah. Waxaa kamid ah:

- Soo dejinta Barnaamijka Mobilke ee ebtEDGE. Barnaamijka Mobile-ka ee ebtEDGE, shakhsiyaadku waxay ka geli karaan macluumaadka gunada KTAP iyo SNAP ee tooska ah ee meel kasta laga soo geli karo hadii internet la haysto. Istimcaalka daaqadaada internetka ah ee lagu geleyo www.ebtedge.com, oo dooro linkiga Cardholder Login. App-kan, waxa aad:
    - Isla markiiba ka arki kartaa baaqigaaga;
    - Eegi kartaa taariikhda dhaqdhaqaaqa ee xisaabtaada;
    - Akhrin kartaa taariikhdaada kaydka dheefaha iyo jadwalka;
    - Bedeli kartaa PIN-kaaga;
    - Ka heli kartaa tukaan u dhaw aagaaga oo aqbala dheefaha SNAP-ka;
    - Ka xidhi kartaa iibka gobolka;
    - Ka xayir kartaa oo xayiraada ka qaadi kartaa kaadhkaaga EBT si aad u joojiso iibka; iyo
    - Wax kale oo badan!
    - Si aad wax badan uga ogaato app-ka taleefanak oo aad usoo dejisato maanta, booqo https://www.fisglobal.com/ebtedgemobile.
- Si joogto ah u bedel PIN-kaaga.
- Hayso lambarkaaga kaadhka EBT iyo PIN-ka sirta ee aad dooratay, oo hala wadaagin cid kale oo aan ahayn kooxdaada gunada. Qari kiibaadhkaaga marka aad gelinayso PIN-kaaga mishiinka.
- Shaqaalaha DCBS ma dalban doonaan lambarkaaga kaadhka EBT iyo PIN-ka oo wada socda marbana. Hadii ruux uu kula soo xidhiidho oo uu ku waydiiyo macluumaadkan, markaba ISKA DHIG!

## Ma waxa aad u tahay dhibane xatooyada gunada elektorooniga ah?

Waa kuwan talaabooyin aad qaadi karto hadii aad ka shakido inaa tahay dhibane xatooyo elektoroonig:

- Dalbo kaadh cusub oo EBT ah markaba adigoo la xidhiidha EBT, adeeg bixinaya Adeegyada Macluumaadka Xatooyada (FIS), kala xidhiidh 1-888-979-9949.
- Gaadhsii xatooyada DCBS adiga oo kala xidhiidhaya Xarunta Adeega La Hadalka taleefanka bilaashka ah 855-306-8959 inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo iyo 4:30 galabnimo ET Isniin ilaa Jimce iyo inta u dhaxaysa 9:00 subaxnimo iyo 2:00 duhurnimo ET Sabtida, Kaliya ama qabo Xafiiska Taageerada Qoyska Deegaanka. Ka hel xafiiska kuugu dhaw https://prd.webapps.chfs.ky.gov/Office_Phone/.

## Waxa isoo gaadhay wargelinta in dheefahaaga la jabsaday.

DCBS waxay bilayday olole wargelin cida qaadata gunada in xogta kaadhkooda EBT la jabsaday. Iyada oo qiimayn lagu samayno xogta, qoyska waxaa la ogaaday in la jabsan karo dheefahooda oo waxaa loo diray wargelin elektoroonig ah ama fariin qorala ah oo lagula socodsiinayo inay dalbadaan kaadh cusub oo EBT iyo inay bedelaan PIN-kooda. Hadii kaadhka EBT la ogaado in la jabsaday, iyada oo aan la eegeynin xaalada ka bixitaan ee iimeelka ama wargelinta qoraalka ah, qoysku waxa uu heli doonaa fariin iimeel ama qoraal ah oo sheegaya xogta soo socda:

> "Xogtaada EBT waa la jabsaday. Kala hadal FIS 1-888-979-9949 markaba si aad u dalbato kaadh cusub oo EBT ah iyo si aad u bedesho PIN-kaaga."

Hadii aad hesho fariintan, waa inaad markaba qaado talaabo adiga oo aad dalabto kaadh cusub oo EBT ah oo aad bedesho PIN-kaaga marka aad timaado. Tani maaha wargelinta xatooyada gunada. Qoysku waa inuu akhriyo taariikhdooda dhaqdhaqaaqa EBT ee hawlaha laga shakiyo. Hadii xatooyo laga shakiyo, gaadhsii xatooyada DCBS adiga oo kala xidhiidhaya Xarunta Adeega La Hadalka taleefanka bilaashka ah 855-306-8959 inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo iyo 4:30 galabnimo ET Isniin ilaa Jimce iyo inta u dhaxaysa 9:00 subaxnimo iyo 2:00 duhurnimo ET Sabtida, Kaliya ama qabo Xafiiska Taageerada Qoyska Deegaanka. Ka hel xafiiska kuugu dhaw https://prd.webapps.chfs.ky.gov/Office_Phone/.

### Sidee ayaan uga warbixinayaa khiyaanada?

Si aad uga warbixiso khiyaano kaalmada shacabka, waxa aad kala xidhiidhi kartaa Xafiiska Baadhitaanka Guud (OIG) lambarka bilaashka ah ee 800-372-2970 inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo iyo 4:30 galabnimo ET.

## Macluumaadka Xidhiidhka

### Qaybta Maamulida Dalabyada

**Iimeelka:** chfscms@ky.gov

**Taleefanka:** 502-564-3440

**Cinwaanka Boosta:**
275 E. Main St. 3E-1
Frankfort, KY 40621

### Qaybta Daacadnimada & Falanqaynta

**Taleefanka:** 502-564-3440

**Cinwaanka Boosta:**
275 E. Main St. 3E-1
Frankfort, KY 40621